

Medverkan waa mashruuc wadashaqeyn ah oo ka dhexeeya afar kammuun: Gislaved, Gnosjö, Vaggeryd iyo Värnamo. Mashruuca Medverkan waxa ka danbeeyey markii dowladdu ay go'aan ku gaartay in kammuunada qeyb libaax ka qaataan waxqabadka looga hortagayo dilka loo geysto dumarka. Waxqabadkaa waxa kale ee uu ku wajahan yahay caruurta ku dhex nool reeraha uu dilka noocan ahi ka dhex dhaco. Ujeedada laga leeyahay mashruucan waa inuu kaamilo shaqada xafiiska arimaha bulshada ee amaanaada dumarka iyo ururada ka dhisan gobalka GGUV ee la shaqeeya dumarka loo geysto dhibaataada dilka ah. Waxaa dhamaan afarta la helayaa in la nala kulmo haddii balan nalaga qabsado.

Medverkan wuxuu si gooni ah u quseeyaa gabdhaha iyo dumarka loo geysto dilka ama qatarta ugu jira in dhibaato dil/handadaad uga timaado qof ehel la ah ama horey ugu dhowaa.

Medverkan waxey kuula diyaar tahay:

- Xog qarín.
- Inaan lagu ogaan haddii aad dooneyso.
- Talosiinta iyo taageereerad gabdhaha iyo dumarka ku jira dhibaataada dilka.
- Caawinta caruurta ku dhex nool dhibaataada noocan ah.
- Isku xirka qeybaha kala duwan haddii loo baahdo. Waxan la shaqeynaa sida xafiiska arimaha bulshada, heeganka dumarka, heeganka dadka danbiga laga galo, goobaha caafimaadka iyo maxkamadaha. Wadashaqeyntaa waxa marka hore lagala tashadaa dumarka dhibku ku dhacay.
- Caawinta dumarka dhibaatooyinka dhanka dhaqanka sharafta uga yimaado.
- Gargaarka iyo taageerada khanisiinta (rag iyo dumar) ee ay dilaan ragga ama dumarka xiriirku kala dhaxeeyo iyo ragga dhibaataada dilka ay ku hayaan dumarka u dhow.
- Warbixin siinta qeybaha kala duwan ee la kulma dumarka dhibaatooyinkani soo gaaraan.
- Howlo ka hortag iyadoo la isticmaalayo warbixin (sida bandhig iyo siminaaro).

Dadkeena ka shaqeeya mashruuca amaanaada dumarka ee Medverkan waa:

Valentina Hasi Telefoon: 0370-331263 iyo Sara Sand Telefoon: 0370-331262

Email: [medverkan@gnosjo.se](mailto:medverkan@gnosjo.se) adarees: Hellmansgatan 3, 335 30 Gnosjö

Dhaqso u doono caawimaad haddii adiga ama qof kuu dhowi ku jiro xaalad deg deg ah, tusaale ahaan haddii nololi qatar ku jirto ama caruuri dhib soo gaarayo. Inaga Medverkan ka sokoow waxaad caawimaad ka heli kartaa:

Arimaha deg dega ah: wac SOS 112

Wixii aan deg deg aheyn boliiska 114 14

Xafiiska arimaha bulshada Gislaved 0371-81 120

Xafiiska arimaha bulshada Gnosjö 0370-33 13 70

Xafiiska arimaha bulshada ee Vaggeryd 0370-784 41

Xafiiska arimaha bulshada ee Värnamo 0370-37 74 10

Xeeganka dumarka Maria ee Gislaved 0371-809 86

Xeeganka dumarka ee Värnamo 0370-475 25

**Medverkan**

-Kvinnofrid i GGUV